# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 0965 EPISTLE THE OF HEBREW 6:19-7:1-3

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."** Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.

Waxaannu caaway idiin sii wadi doonnaa cutubka lixaad ee warqaddii Cibraaniyada loo qoray, Waxaanan uga gudbi doonnaa cutubka 7aad ee Warqaddii loo qoray Cibraaniyadda, waxaana diiradda la saarayaa mawduuca khuseeya in Masiixu yahay wadaadkeenna sare, waxaana lagu macneyaa wadaadnimadiisa isla sidii derajadii Malkii-Saadeq.

**SONG: REEL---CUT---**

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay ama aannu ka faaloonaynay ballamadii Ilaah uu na siiyey isla sidii nebi Ibraahim Ilaa uu u siiyey laba ballan ayaannu innaguna aan la wadaagnaa Ibraahim ballamadaas ayaga ah. Waayo

Nebi Ibraahim waa aabbaha kuwa rumaystay oo wuxuu u weyn yahay ama Aabbe u yahay rumaystayaasha oo dhan.
Waxaa kaloo labadiisii ballan soo raacaya laba kale oo ah in Masiixu dembiyadeenna u dhintay oo uu sarakacay, iyo inuu haatan fadhiyo midigta Ilaah, isagoo ah Wadaadka Sare oo Ilaah hor geynaya baryootankayaga. Waxaan kaloo aragnay in wax waliba ay tusaale ama masaal horudhac ah u ahaayeen Masiixa, oo markii Masiixu uu yimid wax waliba ee masaal ahaan u taagnaa ayaa la soo kaamilay. Tusaale ahaan waxaa beryihii hore dadka reer binu Israa'iil magangal ahaan ugu carari jireen magaalooyinka magangalka oo loo sameeyey kuwa sida kama'a ah wax u dila si aan iyana loo dilin isla markaaba, oo qaraabada qofka la dilay aanu aanu uga aarsan. Ficilkaas isaga ah wuxuu masaal u ahaa Masiixa oo isagu magangalyo siinaya dembiileyaasha. Haddaan markaasi caaway soo gabagabayno cutubkii 6aad ayaannu imminkana eegaynaa 19-20, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:
**"Tan aynu sida barroosinka nafta u haysanno, mid adkaan iyo hubaalba ah oo gelaysa waxa daaha ka shisheeya, meeshii Ciise sida horseed inoo galay isagoo nqoday wadaad sare oo weligiis ah sidii derejadii Masslkisadaq."**
Markii Masiixu uu ku laabtay Samada ama Jannada oo ah halkii uu markii horeba inooga yimid, wuxuu qabsaday jagada Wadaadka Sare, oo waxaa Qoraha oo hoga-tusaalaynaya Cibraaniyada uu leeyahay, 'Waxa daaha ka shisheeya..' Waxaa Masiixa lagu masaalaa in isla sida Wadaadka Sare u galo Macbudka uu isna u galo Samada. Oo Qoraha oo mar kale sifaynaya ama

caddaynaya isku-barbardhiggaasi wuxuu leeyahay sida ku qoran cutubka 8:5, inkstoo aynaan gaarin weli, sidatan:

**"Kuwa u adeega waxa ah u ekaanta iyo hooska waxyaalaha jannada, sidii Muuse loogu digay kolkuu ku dhowaa inuu taambuugga sameeyo. Waayo, wuxuu yidhi, Aad ugu fiirso inaad wax walba u samayso siduu ahaa u-ekaanshihii buurta lagugu tusay."**

Haddaba Masiixu wuxuu ka gudbay Qodduuska Qodduusyada wuxuuna hor istaagay Ilaah, isagoo soo hor-dhigaya dhiiggiisii, wuxuuna fariistay midigta Carshiga Ilaah. Haddaba waxaa jiray kala-duwanaan u dhexaysay Masiixa iyo Haaruun. Haaruun sooma garab fariisanin Ilaah, oo macbudka meeshiisa qodduuska ah waxaa yiillay hal kursi, wuxuuna ahaa Kursiga Naxariista, oo Ilaah baa halkaasi joogay. Shaqada Haaruun waxay ahayd inuu halkaasi yimaado hal goor sannadkiiba, oo markii uu yimaado, si degdeg ah ayuu ku baxayaa, oo welibana si degdeg ah ayuu ku soo gelaya.

Haddaba waxaannu leennahay innaga maanta Ciise Masiix kan ay wax waliba ay ku soo arooraan, ama ay ku soo biyo-shubtaan, oo wuxuu fariistay dhanka midig ee Weynaha Samooyinka ku jira, oo waxaa qoraha Warqaddii Cibraaniyada uu leeyahay sida ku qoran aayaddii 19aad ee Warqaddii looqoray Cibraaniyada: **"Tan aynu sida barroosinka nafta u haysanno…"** waa rajada ah in Masiixu uu yahay kan horgalaha u ah nafsaddeenna ama nolosheenna.

Waxaan leennahay dhegaystayaal qalbi-qaboojin ka badan tii nebi Ibraahim, waayo innaga wadaadkeennu wuxuu kol hore hor yimid Ilaah oo innaga ayuu Ilaah inoo baryayaa oo waa dhexdhexaadiyaha u

dhexeeya Ilaaha Qodduuska ah iyo dadka dembiga leh, aniga iyo adigaba aynu ugu horraynee.
Waxaannu dhegaystayaal haddaba intaas ku soo ekaynaynaa cutubkii lixaad ee warqaddii loo qoray Cibraaniyada oo aynu ku soo aragnay qidcada ugu adag ee kitaabka Qodduuska ah ku qoran, waxaanan isla garannay in badbaadinta Masiixa ee ku timaadda rumaysadk aan lawaayeynin, laakiin la waayayo abaal-marinta lagu helo noloshayada Masiixinnimo.
Haddii aynu si hagaagsan ugu soconno waxbaridda kitaabka Qodduuska ah, oo aynu nafaqada ruuxana ka helno ama inooga timaadda waxbaridda hagaagsan ee rasuullada markaa noloshayadu waxay yeelanaysaa kororsiimo dheeraad ah. Waxaan markaasi bilaabaynaa inaynu ka mira-dhalinno nolosha masiixinnimada ee aynu ku helnay rumaysadka Masiixa.
Haddaan markaasi intaas uga baxno cutubkii 6aad ee kitaabka Qodduuska ah, waa kitaabka Cibraaniyada e, ayaannu imminkana idiin bilaabaynaa dhegaystayaal:

## CUTUBKA 7AAD EE KITAABKA CIBRAANIYADA

Cutubkan 7aad iyo weliba inta ka dhimman warqaddan loo qoray Cibraaniyada waxaa looga hadlayaa maaddada ama mawduuca khuseeya Masiixa Nool, oo imminkadanna fadhiya gacanta midig ee Ilaah. Waa mawduuc beryaheenna aan laga xasuusanin wehelnimada Masiixa, waxaana aalaaba kaniisadaha iyo wehelnimada masiixiyiintu isugu yimaadaan looga hadlaa wax ku saabsan dhimashada iyo sarakicidda Masiix. Taasina waa wax wanaagsan, laakiin saaxiib waxaanu u baahan nahay inaynu oo

aadno ama u nimaadno Masiixa Nool, oo imminka fadhiya gacanta Midig ee Ilaah, oo hawsha uu hayana waa dhexdhexaadiyanimada dadka iyo Ilaah. Haddaba hubaasha hawshaasi Masiixu inoo hayo ayaa noqonaysa waxa tijaabinaya nolosha yada ruux ahaaneed ama masiixinnimo.

Waxaa jiro haddaba tiro gadmaysa marka la eego cutubkan oo aad noloshaada dhex-gelinayso. Su'aasha lays weyddiinayo waxay tahay, sidee baa cutubkan 7aad ee Warqaddan Cibraaniyadu u saamaynayaa nolshayada masiixinnimo ama ruux ahaaneed? Qoraha warqaddan cibraaniyada wuxuu isbarbar-dhigayaa wadaadnimadii Malki-sadeq iyo tii Haaruun.

Waxaannu marka ay sidan tahay ugu hormarinaynaa maaddada kowaad oo ah Wadaadnimadii Masiixa oo masaal ahaan horey laynoogu sii sheegay:

**INAY LA MID TAHAY TII MALKIISADEQ**

Si markaasi aynu arrinkaas isaga ah wax uga ogaanno, ayaannu imminka idiin bilaabaynaa meeriska cutubka 7aad, waxaana sida caadada inoo ay aynu ku bilaabaynaa aayadda 1aad ee Warqaddan Cibraaniyada, waxaana qoran sidatan:

**"Malkisadaqan, oo Saalem boqorka u ahaa, wadaadkii Ilaaha ugu sarreeyana ahaa, wuxuu la kulmay Ibraahim oo ka soo noqday layntii boqorrada, wuuna barakadeeyey."**

Markii la eego turjumada Ingiriisiga ah la eego waxaa erayada ugu horreeya, 'Sidaas daraaddeed', waxaana eraygaasi loo isticmaalay in laysku xiro wixii horey loogu soo sheegay warqaddan iyo waxa imanaya. Waxaanay warqaddu gadaal inoogu celinaysaa aayaddii 20aad ee cutubka lixaad oo ah

aayadda ugu dambaysa markaasoo Masiixu lahaa, **"Meeshii Ciise horseed inoo galay isagoo noqday Wadaad Sare oo weligiis ah sidii derejadii Malkisadaq."**
Haddaba Malkisadaq wuxuu ahaa mid masaal ahaan u taagan Masiixa.
Markii aad eegto qaybta taariikhaha ee Baybalka, ayaa Malkisada waxaa loogu yeeri jiray **'Boqorkii Saalem'** iyo wadaadkii Ilaaha ugu sarreeya, waxaana qisadiisu ay ku qoran tahay kitaabka Bilowgii 14:724. Welibana wax badan laga oran maayo qisadii noloshiisa ama taariikhiisii Malkisadaq. Haddaba magaciisa waynu illoobi lahayn, laakiin Ruuxa Ilaah ayaa isaga illoobin ama hilmaamin. Markii aynu soo gaarno
Sabuurka 110:4 ayaa mar kale magaciisa la so qaaday, oo waxaa Sabuurluhu uu leeyahay, **"Adigu weligaaba wadaad baad tahay sidii derajadii Malkisadaq."**
Haddaba dhegaysta aniga iyo adiguba waxaynu imminka joognaa wakhtigii wadaadnimadii Masiixa. Waxaa imminka jira dhegaystayaal kuwo badan oo Baybalka doodo ka keena, oo diiddan erayga 'Ku-talagalka.' Wadaaddada qaarkood ayaan afkooda laga maqlaynin eraygaas isaga ah ee khuseeya 'Kutalagalka Ilaaha Baaqiga ah'. Marka ay sidan tahay ayaan eraygan isticmaalayaa, waayo waa eray ku qoran kitaabka Qodduuska ah.
Erayga **'Kutalagal'** waa wax saameeya qarniyada kala duwan, oo wuxuu khuseeyaa nidaam soo jireen ahaa oo Ilaah bilaabay, si loo meelmariyo ujeeddooyinka Ilaah uu ka leeyahay **'Aadamiga'**. Tusaale ahaan xilliyadii hore markii aad eegto kitaabka Axdigii Hore, Haaruun baa ahaan jiray 'Wadaadka Sare'.

Waxaa taasu ay ka macne tahay, in faraca kale oo aan isaga ka imaanin aanu qaadan karin jagada wadaadnimada. Waxaa kaloo dhisnaa macbud dadku ay imaan jireen, maantana waxaannu leenahay wadaad sare.

Ha yeeshee kama hawlgalo macbudyo dunidan ka dhisan, wuxuuse fadhiyaa wadaadkan sare gacanta Midig ee Ilaah, oo ilaa maantana halkaas ayuu joogaa isagoo ka wada hawl dhexdhexaadiyanimo. Maadaama aan Qorniinka laga helaynin warbixinno badan oo khuseeya Malkisadaq, ayaa haddana waxaa jira **'Warbixinno kooban oo isaga khuseeya oo ku qoran Warqaddan Cibraaniyada.'**

Waxaa warqaddii Cibraaniyada 5:10 laynoogu sheegay wax ku saabsan wadaadkii sare ee Malkisadaq ahaa, oo waxaannu soo aragnay in qoruhu lahaa: "Oo Ilaah baa isaga wuxuu ku magacaabay wadaad sare sidii derejadii Malkisadaq." Marka qoruhu sidaad leeyahay wuxuu ka hadlayaa Masiixa, oo uu derajo ahaan la simayo Malkisadaq. Weliba waxaan kaloo wax Malkisadaq ku soo aragnay aayaddii 20aad ee cutubkii 6aad, markaasoo Qoruhu uu lahaa: **"Meeshii Ciise sida horseed inoo glaay isagoonqoday wadaad sare oo weligiis ah sidii derejadii Malkisadaq."**

Mar kale ayaa Qoruhu uu ku soo celinayaa markan aannu soo gaarnay cutubka 7:1, wuxuuna leeyahay: **"Malkisadaqan, oo Saalem Boqorka u ahaa, wadaadkii Ilaaha ugu sarreeyana ahaa, wuxuu la kulmay Ibraahim oo ka soo nqoday layntii boqorrada, wuuna barakeeyey."**

Cutubkan ayuu qoruhu wax badan ku soo xiganayaa Malkisadaq, aayaddan furaha u ah cutubkan waa aayadda 17aad, markaasoo qoraha Cibraaniyadu uu leeyahay: **"Waayo isaga waxaa loogu markhaati**

**furay, Adigu weligaaba wadaad baad tahay sidii derejadii Malkisadaq.**" Maaddaama aynu eegayno Masiixa oo leh wadaadnimada la mid ah tii Malkisadaq ayaa waxaa loo baahan yahay inaynu wax badan ka ogaanno wax ku saabsan Malkisadaq.

Waxaannu haatan dib ugu noqonaynaa halka taariikhda Malkisadaq ay ka bilaabanayso sida ku qoran kitaabka Bilowgii 14. Dhacdadan ku qoran kitaabka Bilowgii cutubka 14aad waxay dhacday markii wiilkii Ibraahim adeerka u ahaa uu degay Sodom. Waxaana Cutubkaasi ku qoran dagaalkii ugu horreeyey ee kitaabka Qodduuska ah lagu sheego. Boqorradii Bariga ayaa waxay samaysteen gaashaanbuur, oo waxay ku soo duuleen boqorradii Galbeedka, kuwaasuna waa Boqorradii degganaa nawaaxiga Badda Mootan.

Boqorradii Bariga waxay ka adkaadeen kuwii Galbeedka, waxayna kaxaysteen mood iyo nool oo ay ku jiraan dad ay u kaxaysteen inay addoomo u noqdaan. Caasimadihii oo dhannna way bililiqaysteen, markaasaa farriin loo keenay Nebi Ibraahim, oo waxaa loo sheegay in nebi Luut iyo rag iyo dumar kaleba ay kaxaysteen boqorradii Bariga. Isla markiiba Nebi Ibraahim wuxuu hubeeyey 318 dhallinyaro ahaa, oo ka mid ahaa kuwii hantidiisa iyo xoolihiisa maamulayey. Waxaanay taasu ay muujinaysaa in nebi Ibraahim uu lahaa qoys ballaaran, inkastoo wakhtigaas isaga ah aanu Isxaaq dhalan, oo welibana Ismaaciil ma dhalan sida abbaart ah. Waxaa markaasi sida abbaarta ah soo baxaya in shaqaalihii guriga nebi Ibraahim joogay ay ku dhowaayeen ilaa iyo kun qofood. Markii uu soo kaxaystay 318 kaas dhallinyarada ah,

ayuu weerar gaadmo ah ku soo kiciyey ama ku soo qaaday si uu kaga guulaysto boqorradii Bariga. Danta weerarka uu ka lahaana waxay ahayd inuu soo kaxaysto wiilkiisii nebi Luut ahaa, laakiin weliba markii uu weerarka soo qaaday waxaa u suurtagashay inuu soo furto boqorradii Sodom iyo kuwii kale ee horey looga adkaaday. Haddaan wax idiinka bidhaaminno kitaabka Bilowgii 14 ayaannu imminka eegaynaa aayadda 17, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Markuu ka soo noqday layntii Keorlaacomer iyo boqorradii la jiray kaddib ayaa boqorkii Sodom Aabraam kaga hor tegey Dooxo Shaweh oo ahayd Dooxadii Boqorka."**

Boqorkii Sodom hal arrin buu u soo jeediyey Ibraahim, Ibraahimna waa ka diiday, oo isla markiiba waxaa soo galay qisada Malkiisadaq sid aku qoran aayadda 18aad ee cutubka 14, oo wuxuu Qorniinku leeyahay: "Oo malkisadaq oo ahaa boqorkii Saalem baa keenay cunto iyo khamri; wuxuuna ahaa wadaadkii Ilaaha ugu sarreeya." Haddaan taariikhdii Malisadaq iyo sidii uu baalasha kitaabka Qodduuska ah ku soo galay halkaas ku dhaafno, ayaannu imminka ku soo noqonaynaa Warqaddan Cibraaniyada, oo waxaannu bal eegaynaa waxa ay inoo raaciso. Waxaana la soo kala baxaynaa 7:2, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Oo Ibraahim wuxuu isagii wax kasta ka siiyey toban meelood oo meel. Malkisada hortii waxaa magiciisii lagu fasiray, Boqorka Xaqnimada, dabadeedna, Boqorka Saalem, oo ah Boqorka Nabadda."**

Haddaba mufasiriinta qaarkood bay la tahay in Saalem ay tahay Yerusaalem, ha yeeshee aniga ilama

ahan sidaas. Saalem magaceedu wuxuu ka micne yahay meeshii nabdoonayd. Wuxuu markaasi Malkisadaq ahaa boqorka nabadda, wuxuu kaloo ahaa nin loogu yeeri karo shirarka nabadda wakhtigiisii. Waxaanan hubaa inuu ahaa boqor xukuma magaalada magaca Saalem wadata, laakiin taasu kama dhigna inuu ahaa boqorka Yeruusaalem, wuxuuse weliba noqon karaa boqorka meel waliba, laakiin meeshii uu xukumayey waxay ahayd magaalo nabdoon. Waxaa kaloo Malkisadaq loogu yeeray inuu ahaa Boqorka Xaqnimada, oo magaciisuna wuxuu ka macne yahay **'Boqorka Xaqnimada'** oo markii aad eegto luuqadda Cibraaniyada ayaad arkaysaa in Malik ay ka macne tahay **'Boqor'** Sadaqna ay ka macne tahay 'Xaqnimo'. Yeremyaah ayaa mid ka mid ah aayadihiisii ku sifeeyey in Ilaah inuu yahay mid Xaq ah, oo wuxuu ula jeedaa in Yahweh uu yahay 'Xaqnimadeenna'. Malkisadaq waa Wadaadka Ilaaha ugu Sarreeya, haddaba innaga waxaa wadaad sare inoo ah maanta Masiixa. Haddaba tan xiisaha leh waxaa weeye in Malkisadaq la kulmay nebi Ibraahim, wuxuuna Malkisadaq qudhiisa keenay cabitaan iyo kibis.

Waxaanan is-leeyahay labadaas qof ee magaca iyo muunada lahaa wakhtigii Axdigii Hore, waxay xusuusnaayeen cashadii ugu damaysay ee Sayidkeenna, waayo mar walia ee la soo xusuusanayo cashada Sayidkeenna Ciise Masiix waxaa la cunaa kibista oo u taagan jidhkiisa, iyo cabitaanka oo utaagan dhiiggiisa. Haddaba waxay dhowrayeen ama sii saadaainayaan Imaanshaha Masiixa oo markaas iyada ah imaanayey muddo laba kun oo sannadood ah dabadeed.

Aniga iyo adiga, waa kuweenna masiixyiyiinta ah e, waxaynu cunnaa rooti iyo canab la miiray si

aynu u xusuusanno jidhkiisii iyo weliba dhiiggii uu inoo daadshay Masiixa. Raggaas magaca weynku leh Qorniinka ayaa xusuustay cashadii u dambaysay ee Sayidka maalintaasi aad u fog. Haddaba ha I weyddiinin inaan kuu sharraxo, laakiin waxaan dareenkiinna u soo weecinayaa dhegaystayaal kibista iyo canabka la miiray, oo midi astaan u yahay jidhkii Masiixa, kan kalena astaan u yahay dhiiggii Masiixa.

Si kale oo aad ku aqbali karayso ma laha inaad rumaysato hadallada Ilaah iyo waxa ay tibaaxayaan mooyaane. Haddaan faalladii gaabnayd intaas ku soo ekayno, ayaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal Warqaddii Cibraaniyada 7:3, waxaana weli la sii faaqidayaa 'Malkiisadaq' oo isagu astaan ama masaal u ahaa Masiixa, oo wuxuu qoruhu leeyahay:

**"Aabbe ma lahayn, hooyona ma lahayn, abtirsiiyona ma lahayn, oo isagoo aan lahayn bilowga maalmaha ama dhammaadka nolosha laakiin loo ekaysiiyey Wiilka Ilaah, ayuu weligiis wadaad sii ahaanayaa."**

Waxaannu aayaddan ka ogaanaynaa inuu Malkisadaq ahaa masaalka Masiixa, iyo mid astaan muuqata u ahaa Ciise Masiix. Sayid Ciise Masiix Bilow ma lahayn Dhammaadna ma lahayn.

Isagu wuxuu joogay bilowgii, oo dhammaadkana wuu joogyaa, oo waa Alpha iyo Omega. Haddii aad dib ugu noqoto wakhtigii tegay, halkaas ayuu joogaa, oo welibana mustaqbalka ayaa u horreeya saaxib. Wuxuu ku  dhex jiraa wakhtiga oo dhan, oo isagaa waayaha ka cad cad. Sidee baa haddaba loo heli karaa qof isaga lagu masaali karo? Malki-sadaq wuxuu ku jiraa kitaabka Bilowgii, waana kitaabk abtirsiinyo, oo wuxuu inoo sheegayaa meesha qof

waliba oo magac leh oo kitaabka ku qoran uu ka yimaado.

Waxaa laynoo sheegay in Aadan uu dhalay Qaabiil iyo Haabiil, iyo weliba Seet oo u dhashay kaddib markii Qaabiil uu dilay walaalkiis Haabiil. Waxaa kaloo laynoo sheegayaa in nebi Ibraahim Aabihiis la oran jiray Tarrax, oo nebi Ibraahimna wuxuu dhalay Isxaaq, Isxaaqna wuxuu dhalay Yacquub iyo Ceesow sida ku qoran Kitaabka Bilowgii. Waxaana kitaabka laynagu siinayaa Abtirka ama mid waliba ee la soo magac qaado.

Ha yeeshee Malkisadaq wuxuu soo dhexgalay baalasha kitaabka Qodduuska ah, oo meeshii uu ka yimid iyo meesha uu aadayna laynooma sheegin. Markii uu soo dhex galay baalasha kitaabka qodduuska ah, lama arag meeshii uu ka baxay iyo taariikhdiisii toona. Su'aasha soo baxaysa ayaa waxay noqonaysaa waxa Ilaah baalasha kitaabka Qodduuska ah uga bixiyey Malkisadaq. Ha yeeshee Malkisadaq wuxuu ahaa mid masaal u noqonaya wadaadnimada Masiixa.

Waxaana waxyiga ku qoran Sabuurka 110 aynu ku arkaynaa in Malkisadaq sawir ahaan ugu taagan yahay wadaad kale, waana wiilka Ilaah, oo wadaadnimadiisuna way sii waaraysaa oo dhammaad ma leh kan waxyigu quseeyo, kaasuna waa Ciise Masiix, waayo isagu waa

wadaad weligiis jiraya. Sabuurluhuna wuxuu yiri, **'Adigu wadaad baad tahay sidii derajadii Malkisadeq'.**

**SONG: REEL---CUT---**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin.